# GURI KA SAARID HORE IYO WARBIXINTA DEYNTA

## *Kireysteyaasha: Ogoow Xuquuqdaada!*

**Marka loo eego Xeerka Guriyeyaha Loo Siman Yahay, laguuma diidi karo kiraysi sababtoo ah...**

| Cidaada, isirkaaga, ama qawmiyadadda | Naafanimmo | Diinta | Heerka Qoyskaaga | Aqoonsiga jinsigaaga ama dookha galmada |
|---|---|---|---|---|

## Haddii ay taa kugu dhacdo, wac waaxda la Talinta Guri ka Saarida

### Waa maxay a warbixinta deynta? Ma ka duwan tahay baaritanka dabagalka?

**Warbixinta deytaada** waa diwaanka sheegaya **taariikhdaada maaliyadeed**. Waxay laga helayaa xogo sida inaad **biilashaada bixisay waqtigii loogu talagalay**, ama haddii aad waligaa **kacday**, iyo haddii aad **dalbatay amaah iyo kaararka daynta**.

**Baritaanka dabagalka ah**, sidoo kale loo yaqaan **barataanka asalka**, waa waxa ay milkilayaashu isticmaalaan marka ay **go'aaminayaan inay qof wax** ka kiraynayaan. Waxay ku jira xoga la mid ah kuwa ku jira warbaxinta daynta, lakiin waxyaabo kale ayaa dheer sida **diwaanka dembiyada**, **guri ka saaris hore**, iyo **taariikhda shaqooyinkaaga.**

### Codsigaygii waa la diiday kolkii dabalgal laygu sameeyay. Maxaa samayn karaa?

Haddii mulkiiluhu uu diido codsigaaga kirada sababtoo ah wax ka soo baxay baaritaada, waxaad xaq u leedahay inaad aragto koobi ah warbixinta ay isticmaaleen. Sidan baadna ku heli kartaa:

**Qoraal ahaan ku weydii milkiilaha magaca adeega dabagalka ah ay u isticmaaleen baritaanka dabagalka.**

**Shirkadda iimaylka kala xidhiidh ama boostada oo weydii koobi warbixintaada**

**Si taxadar leh u fiir warbixinta. Ma ku yaalaan wax dhaawici kara fursadahaaga kiraysiga?**

**Haddi ay jiraan wax kasoo baxay baaritaanka dabagalka uu kugu sameeyay mulkiilaha taas oo keentay in laguu diido kiro, waxaa u sharxi kartaa waxa arrinkaa keenay si ay fikirkooda u bedelaan.**

### Haddii uu khalad ku jiro dabagalkaaga, waad hagaajin kartaa.

Ma kaadhka credit baa ka muuqada warbixinta **oo adan lahayn**? Dabagalka taariikheed ma waxa uu sheegaya in laguugu soo **oogay dambi aanad galin**?

Haddi uu khalad ku jiro warbixinta credit-ka ama dabalkaaga, waxa aad **furi kartaa muran ka dhan ah adeega dabagalka** adiga oo u diraya **waraaq sharxaysa khaladka** ama adiga oo **buuxinaya foom boggooda** internetka. Haddii aad wax ka maqli weydo **30 maalmood gudahood** ama ay **diidaan anay saxaan qaladka**, waxaa ku dalici kartaa **dacwad** adiga oo **u maraya Xafiiska Ilaalinta Maaliyadeed ee Macmiilka** ee userfinance.gov/complaint.

**SOMALI -- CREDIT REPORTS**

LEGAL AID SOCIETY OF MIDDLE TENNESSEE AND THE CUMBERLANDS **(833) 837-HOME**

AMAC American Muslim Advisory Council **(615) 988-6460**

conexión américas **(615) 701-7957**

**Macluumaadkan waxaa loogu talagalay oo keliya Degmada Davidson**. Macluumaadka halkan lagu bixiyay maaha oo looguma talagelin inay ka dhigaan talo sharci. Haddii aad qabto dhibaato sharci, fadlan wac qareen gaar ah ama wac Ururka Gargaarka Sharciga ee deegaankaaga ee Tennessee Dhexe iyo xafiiska Cumberlands 1-800-238-1443 ama Ururka Bar Association ee Isbaanishka Nashville 1-615-701-7957. Dib loo eegay 9/23.